

## **Ha Qatar Galin Xadka Ku Meel Gaarka ee Waxa Qorshaha Daawadu Ka Dabooli Doono Daawooyinka BadgerCare Plus iyo Medicaid.**

### **U diyaargarow isbeddellada imanaya gudaha 2022-Ka.**

Sharciyo gaar ah ayaa la dejiyay intii lagu jiray xaaladda degdega ee COVID-19 si loogu oggolaado dad badan inay helaan oo ay haystaan manaaficda BadgerCare Plus iyo Medicaid. Waqtiyada caadiga ah, Wisconsin ayaa dib u eegtaa macluumaadka ay bixiyaan xubnuhu oo dib u cusboonaysiiyaan ka qaybqaadashadooda Medicaid haddii ay wali u qalmaan. Si kastaba ha ahaatee, iyadoo la adeegsanayo awoodda ay bixisay dawladda federaalku sababta ah COVID-19 awgiis, gobolladu qofna kama saarayaan barnaamijyada kasta ee Medicaid ah inta lagu jiro xaaladda degdegga ah, xitaa haddii ay soo wariyeen isbeddello kuwaas oo macnahoodu yihiin inaysan usii qalmin.

Iyada oo la rajeenayo in xaalada degdegga ahi ay dhammaanayso 2022-ka, Waaxda Adeegyada Caafimaadka ee Wisconsin (Wisconsin Department of Health Services, DHS) waxey isku diyaarinaysaa iney "ka-noqoto" xeerarka gaarka ah oo ayna dib u bilaabto hannaanka cusboonaysiinta ee meesha ka jiray ka hor COVID-19.

Ma heshaa manaaficda Medicaid ama BadgerCare Plus? Ha moogaanin isbeddelada imanaya gudaha 2022-ka.

**Halkan ayeey ku yaasha waxaad sameyneyso si aad u xaqiijiso inaad hesho macluumaad muhiim ah oo ku saabsan sida loo cusboonaysiiyo caymiskaaga marka xaaladda degdega ahi ay dhammaato.**

- **Cusbooneysii ciwaankaaga, lambarka taleefonkaaga, iyo iimaylkaaga** si ay isbeddelada ku saabsan ceymiska ay kuu soo gaaran. Ka gal [access.wi.gov](https://www.access.wi.gov) ama la xiriiir [wakaaladaada maxalliga ah](#).
- **Fur oo akhri boostadaada.** Ka eego warqad ka timid Waaxda Adeegyada Caafimaadka ee Wisconsin si aad u ogaatid waxa isbeddelaaya iyo sida isbeddeladu ay kuu saameeyaan.
- **Tallaabo qaad ilaa waqtiga kama danbeysta.** Warqaddu waxay kuu sheegi doontaa waxaad u baahan tahay inaad sameyso si aad u sii haysato manaaficdaada.

### **Su'aalaha?**

Kala xiriiir waaxdayada adeegyada xubnaha 888-203-7770 (TTY: 711). Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawinno.